



Tilmaamaha 2023-2025

Waste-Free Communities Matching Grant

(Deeqda Maalgelinta Udhiganta ee Bulshooyinka Ka caagan Wasakhda)



Seattle
Public
Utilities



Codsiyada ayaa ku eg 5:00 PM bisha Maarso 24, 2023

Seattle Public Utilities (SPU, Adeegyada dadwaynaha ee guriga ee Seattle) ayaa hadda aqbalaaya codsiyada deeqda mashruucyada bulshada ee diirada lagu saaraayo kahortaga wasakhda. Kahortaga qashinka waxaa loola jeedaa yaraynta wasakhda si waxyaabo kuwii hore kayar u maraan dib u warshadayn, shidid, iyo xabaalid. Markaan kahortagno qashinka, waxaan caawinaynaa bii'ada, waxaan difaacaynaa caafimaadka dadwaynaha, waxaana dhisaynaa bulshada, waxaana badbaadinaynaa lacag.

Yoolalka Barnaamijka Deeqda

- Taageerida hogaanka bulshada iyo hal abuurka ku aadan kahortaga wasakhda
- Kordhinta helitaanka loo siman yahay ee bulshada ee ku aadan fursadaha iyo faa'iidooyinka kahortaga qashinka
- Difaacida bii'ada iyo caafimaadka bulshada ayadoo la adeegsanaayo tashiilida khayraadka iyo yareynta sunta hawada lagu siidaayo iyo wasakhowga
- Yaraynta tirada alaabaha lagu daraayo qashinka gudaha Seattle

Dulmarka Maalgelinta

- Waxaa loo diyaariyay lacag wadarta guud ay tahay \$200,000 oo lagu bixinaayo mareegtaan deeqda.
- Codsiyada deeqda ayaa u dhaxayn kara \$3,000 illaa \$40,000. SPU waxa ay ku abaal marin kartaa cadad kayar ama kabadan inta la codsaday.
- Waxaa jira shardiga deeqda oo dhan 25%. Tusaale: \$40,000 oo deeq ah + \$10,000 oo udhiganta = \$50,000 oo wadarta guud ee miisaaniyada ah.
- Abaal marinada deeqda ayaa lagu bixiyaa qaab magdhaw ah. Kuwa qaadanaya abaalmarinta waxa ay codsan karaan ilaa 10% ee wadarta abaal-marinaha deeqda oo hormaris ah si loo taageero kharashyada billoowga ah ee mashruuca.
- Mashruucyada waxaa laga yaabaa inay bilaabmaan ugu horayn Juulaay 2023. Lacagta waa in la adeegsadaa lana soo gudbiyaa xisaab celinteeda ugu danbayn Juun 30, 2025.

Xog ku saabsan Kahortaga Wasakhda

Dib u warshadaynta iyo qashin gubida waa wax wanaagsan. Laakiin inaad wax qashin ah abuurin marka koobaadba ayaa kasii fiican!

Waxkasta oo aan iibsano ama adeegsano waxay u baahan yihiin kheyraad la isticmaalo si aan u samayno badeecad u baakadayno, u rarno, u adeegsano, aana kadib dib ugu warshadayno, gubno, ama xabaalno. Dhammaan tallaabooyinka waxay leeyihiin saamayno waawayn oo ku dhacaaya hawada aan neefsano, biyaha aan cabno, iyo ciida aan cuntada ku beerano.

Waxaan ka hortagi karnaa qashinka anagoo:

- iibsanayna oo adeegsanayna waxyar
- samaynayna ama iibsanayna badeecooyin waara
- adeegsanayna bakaadayn yar
- dooraneyna inaan hagaajino, dib u isticmaalno, oo aan iibsano waxa lasoo isticmaalay
- la wadaagayna, ku deeqayna, ama dib u iibinayna agabka si dadka kale markale u adeegsadaan
- uga shaqaynayna oo adeegsanayna qashinka cuntada iyo fagaaga ee meesha yaala

Markaan qaadno tallaabo aan uga hortagayno qashinka, waxaan:

- kaydinaynaa lacag anagoo iibsanayna oo adeegsanayna waxyar
- waxaan caawinaynaa bulshadeena anagoo ugu deeqayna waxna la wadaagayna
- yaraynaynaa sunta hawada iyo biyaha oo waxyeelada ku ah caafimaadka aadanaha iyo duurjoogta
- dhaqaalaynaynaa khayraadka dabiiciga ah, sida biyaha, tamarta, dhulka, iyo shidaalka.
- yaraynaynaa gaaska hawada wasaqeeya oo keenaaya isbadalka cimilada

Su'aalo ma qabtaa? Veronica Fincher kala xiriir WasteFreeGrants@seattle.gov ama (206) 615-1405

www.seattle.gov/utilities/wastefreegrants

Shuruudaha Mashruuca

Mashruucyadu waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda si ay ugu qalmaan:

1. **Waxqabadyadu waa inay kordhiyaan kahortagga qashinka.**

Tusaalooyinka mashruucyada uqalma waxaa kamid ah:

- Tijaabinta barnaamijka bacda cuntada ee dib loo isticmaali karo ee xarumaha nololeed ee la caawiyey
- Tijaabinta xeeladaha lagu hagaajinayo wada-xariirka u dhexeeya dadka cuntada ku tabaruca iyo ururada gargaarka gaajada
- Daahfurka nidaamka weelasha dib loo isticmaali karo
- Furitaanka ama ballaarinta maktabadda waxyaabaha
- Tijaabinta xeeladaha looga hortagayo beeldareynta cuntada ee meelaha guryaha la isla isticmaalo, sida guryaha ardayda
- Fikradaha kale ee hal abuurka leh ee aad u hayso ka hortagga qashinka!

Waxqabadyada soo socda uma qalmaan lacagta deeqda ah:

- Kharashyada shaqada ee socda si loo joogteeyo hawlaha heerarkooda ka hortagga qashinka ee hadda
- Dib u warshadaynta
- Qashin gubida ka baxsan goobta (looga warshadeeyey laguna isticmaalay meel kale)
- Adeegsiga alaabaha dib loo warshadayn karo iyo kuwa la gubi karo
- Waxqabadyada qashin aruurinta
- Saamiyada baaskiilka iyo saamiyada gaariga

2. **Waxqabadyada waa in lagu sameeyaa gudaha magaalada Seattle ama ay saamayn toos ah ku leeyihiin qashinka ka jira Seattle.**

Codsadayaashu waa ay degenaan karaan meel kabaxsan Seattle ilaa iyo inta mashruucu si cad u muujinayo xiriirka adag ee kala dhexeeyo qulqulka qashinka Seattle.

Arag khariirada xaduudaha magaalada Seattle: <http://clerk.ci.seattle.wa.us/~public/nmaps/fullcity.htm>

3. **Waxqabadyadu waa inay horumariyaan mid kamid ah ama ka badan meelaha soo socda ee mudnaanta la siinayo:**

A) Hal abuurka: Tijaabinta ama balaarinta qaabab cusub ama tignooloojiyad ama abuurista fursadaha kahortagga qashinka oo cusub oo laga abuurto Seattle.

Tusaalayaasha mashruucyada horey loo sameeyay:

- tijaabinta bakhaarka guurguura ee bulshada ee bilaashka ah
- muujinta kiiska ganacsiga ee adeegsiga alwaaxa horay loo isticmaalay loona adeegsado dhisme cusub

B) Ballaarinta Helitaanka iyo Kaqeybgalka Loo Siman Yahay: In si waxtar leh looga qeybgeliyo bulshooyinka waagi hore iyo hadaba laga reebay waxqabadyada kahortagga qashinka. Tusaalooyinka bulshooyinka mudnaanta leh waxaa ka mid ah dadka asaliga ah, Afrikaan Ameerikaanka ah, dadka soo galootiga ah, qaxootiyaasha, danyarta, dadka naafada ah, LGBTQIA2+, waayeelka, dadka qaangaarka ah ee da'yarta ah, dhalinta, carruurta, iyo/ama ganacsiyada yaryar.

Tusaalayaasha mashruucyada horey loo sameeyay:

- shaqaalaysii dadka waayeelka ah si ay uga qaybgalaan munaasabadaha dayactirka bulshada
- bixinta kheyraadka si loogu caawiyo ganacsiyada yaryar inay kahortagaan qashinka

C) Kordhinta Loo Siman Yahay ee Faa'iidooyinka Bulshada: Kordhinta faa'iidooyinka kahortagga wasakhda ee ay heli karaan bulshooyinka waagi hore iyo hadaba laga reebay, sida kordhinta Kheyraadka bilaashka ah ama qiimaha jaban ama tababar shaqo oo loogu talagalay dadka ay haysato hoy la'aanta ama cunto yarida.

Tusaalayaasha mashruucyada horey loo sameeyay:

- shaqaalaysiinta haweenka soo galootiga ah iyo qaxootiga si loo abuurto loona gado agabka guriga ee laga sameeyay qashinka dharka
- kasoo aruuri cuntada aan qurmin kiraysteyaasha guryaha marka ay ka guuraan kadibna ugu deeq kaydada cuntada ee deegaanka

Marka laga yimaado shuruudaha kore, Codsiyada **ugu tartanka badan** ayaa sidoo kale yeelan doona:

- Xujo ama su'aal si cad loo qeexay oo uu mashruuca deeqdu gacan kageysan doono inuu xalliyo
- Qorshe lagu isticmaalayo, kahor ama kadib mashruuca deeqda, tallooyinka cilmi baarista ama qalab kasta oo la sameeynayo
- Qorshe lagu maalgelinayo sii wadida, balaarinta, ama marxaladaha xigga ee mashruuca kadib marka deeqda ay dhammaato
- Saamayn ka baxsan hal urur ama ganacsi. Tusaale ahaan, la shaqaynta kuwa kale si loo balaariyo gaarista mashruuca deeqda, kaqeybgelinta bulshada mashruuca, ama wadaaga aqoonta laga faa'iiday mashruuca si kuwa kale looga caawiyo inay hirgeliyaan dadaalo lamid ah oo lagula tacaalayo kahortagga qashinka ee Seattle.

Qofkee ayay tahay inuu codsado

SPU waxay dhiiri gelinaysaa codsiyada ka yimaada:

- Ganacsiyada
- Ururada faa'ido doonka ahayn
- Kooxaha bulshada iyo xaafada
- Dugsiyada, kuleejyada, iyo jaamacadaha
- Xarumaha (sida daryeelka caafimaadka iyo guriyaynta)
- Ururada ku salaysan diinta
- Barnaamijyada dhallinta iyo carruurta

Codsadayaasha ayaa gudbin kara wax ka badan hal codsi laakiin waxay kaliya u qalmaan inay helaan hal abaalmarinta deeqda ah wareeg kasta oo deeqda ah.

Dhammaan codsadyaashu waa inay haystaan ruqsadaha ganacsiga ee Gobalka Washington iyo Magaalada Seattle si ay u helaan lacagta deeqda ah, ama ku shaqeeya ayagoo usoo maraaya Wakiilka Dhaqaalaha oo leh ruqsadii laga rabay. Wakiil Dhaqaale ayaa qaata masuuliyada qaadashada iyo maamulida lacagta deeqda mashruuca lagu bixiyo.

Xogta ruqsada ganacsiga ee Magaalada Seattle: <https://www.seattle.gov/office-of-economic-development/small-business/food-businesses/licensing>

Xogta ruqsada ganacsiga ee Gobalka Washington: <https://dor.wa.gov/>

Dib u codsashada

Codsadyaashu waxay dib u codsan karaan deeqda mareeg kasta oo maal gelin ah ayagoo:

- Dib u codsanaaya mashruuc aan lagu siin maal gelin dhaqaale. Waxaan ku talinaynaa in aad nalasoo xariirto si aad u ogaato sida aad kor ugu qaadi karto codsigaaga mareegta xigta ee maal gelinta.
- Ayagoo ku codsanaaya fikir mashruuc oo cusub.
- Ayagoo codsanaaya balaarinta mashruuc horay loogu maalgeliyay ama dhaqan gelinaaya wajiga labaad. Codsigu waa inuu muujiyaa inuu kordhinaayo kahortagga qashinka. Maalgelinta deeqda looma isticmaali karo in lagu joogteeyo mashruuca heerarka ka hortagga qashinka ee hadda jira.

Shuruudaha Maal gelinta iyo Qarashka Udhigma

Maal gelinta

- Waxaa loo diyaariyay lacag wadarta guud ay tahay \$200,000 oo lagu bixinaayo mareegtaan deeqda.
- Codsiyada deeqda ayaa u dhaxayn kara \$3,000 illaa \$40,000. SPU waxa ay ku abaal marin kartaa cadad kayar ama kabadan inta la codsaday.
- Lacagta maal gelinta waa in la adeegsadaa lana soo gudbiyaa xisaab celinteeda ugu danbayn Juun 30, 2025.

Kharashgareynta Uqalanta

Kuwa soo socda waa tusaalooyinka kharashgareynta ee qalmi kara maalgelinta deeqda:

- Waqtiga shaqaalaha loo qoondeeyay mashruuca deeqda (waxaa kujiri kara madax tiris)
- Mushaarka iyo caawimaadaha kale ee ka qaybgalka mashruuca
- Agabka mashruuca, alaabaha, iyo qalabka
- Adeegyada sida turjumaada, daabacaada, iyo naqshadeynta
- Kirada xarumaha ee shaqooyinka mashruuca
- Cuntada iyo cabitaanka nashaadaadka mashruuca, marka laga reebo cabitaannada khamriga
- Socdaalka iyo baakinka ee hawlaha mashruuca (oo lagu qiimaynaayo qiimaha socdaalka ee federaalka)
- Kharashka wakiilka dhaqaalaha (oo dhan illaa 10% codsiga deeqda)

Shuruudaha Qarashka Udhigma

Codsadayaasha waxaa looga baahan yahay inay ka qeyb qaataan kharashaadka mashaariicda deeqaha lagu bixiyo.

- Lacagta udhiganta deeqda waa inay noqotaa ugu yaraan 25% ee deeqda la codsaday. Tusaale ahaan: \$40,000 oo codsiga deeqda ah + \$10,000 oo udhiganta = \$50,000 oo wadarta guud ee miisaaniyada ah.
- Wax ku biirinta u dhiganta waa inay gaar u tahay mashruuca. Tani waxaa kujiri kara lacag caddaan ah ama deeqaha kale ee loo isticmaali doono in lagu maalgeliyo qeyb kamid ah mashruuca, iyo deeqaha taageera hawlaha mashruuca deeqda, sida saacadaha is xilqaanka ah, goobta, adeegyada, iyo sahayda.
- Saacadaha mutadawaca ee aan mushaarka lagu bixin oo lagu qiimeeyey \$34.87/saacadii ayaa lagu salaynaayo Qiimaha Qaybta Madaxa Banaan ee Waqtiga Mutadawaca ee Gobalka Washington.
- Khayraadka Magaalada Seattle sida waqtiga shaqaalaha Magaalada, xarumaha Magaalada ee la adeegsaday, iyo/ama Maal gelinta kale ee Magaalada ayaa loo aqoonsan karaa qayb kamid ah magdhaw.

Qandaraaska iyo Qarashka

Wakiilada Dhaqaalaha

Codsadayaasha ayaa dooran kara inay ku shaqeeyaan Wakiilka Dhaqaalaha oo qaadanaaya masuuliyada qaadista iyo maamulida dhaqaalaha deeqda ee mashruuca. Codsadayaasha ayaa masuul ka ah aqoonsiga Wakiilkooda Dhaqaalaha iyo xaqiijinta in Wakiilka Dhaqaaluhu haysto ruqsadaha ganacsiga oo shaqaynaaya ee Gobalka Washington iyo Magaalada Seattle. Wakiilka Dhaqaalaha ayaa kaa qaadi kara lacag dhan 10% lacagta deeqda. Codsadayaasha ayaa ku dari kara qarashkaan codsiga ah deeqda ama u codsan kara magdhaw ahaan.

Qandaraas Bixinta

Qof kasta oo maal gelinta qaata ama Wakiilka Dhaqaaluhu waa inuu soo gudbiyaa foomka W9 oo uu saxiixaa heshiis uu la galaayo SPU si loo siiyo maal gelinta deeqda. Heshiiska waxaa ku jiraaya shuruudo iyo xeerar dheeraad ah oo deeqda ku xiran.

Deeqdu waxay soo magaysaa qarashka shaqooyinka mashruuca ee dhacay kadib marka aad heshiis la saxiixatay Magaalada.

Shuruudaha Caymiska

Dadka qaata deeqda ama Wakiilkooda Maaliyadda waa inay lahaadaan heerarka caymiska ee ganacsiga caadiga ah oo fulinaaya shaqo lamid ah cabir ahaan iyo qaab ahaan mashruuca deeqda, aana ka hoosayn inta uu amraayo sharciga Gobalka Washington. Caymiska magdhawga shaqaalaha waa in sidoo kale la haystaa haddii sharciga Gobalka Washington uu sidaas dhigaayo.

Lacag Bixinta

Abaal marinada deeqda ayaa lagu bixiyaa qaab magdhaw ah. Dadka deeqda qaata ayaa gudbinaaya codsiyada lacagta ayadoo lagu salaynaayo dhamaystirka hiigsiyo gaar ah oo lagu aqoonsaday heshiiska deeqda ama ku salaysan kharashaadka dhabta ah. SPU ayaa jeegaga magdhawga boostada kusoo diraysa 30 maalmood kadib marka deeq qaatuhu codsiga lacagta soo gudbiyo. Lacagta ayaa dib u dhacaysa haddii codsiyada lacagtu kala dhiman yihiin ama warbixino qasab ah iyo dukumiintyo ka maqan yihiin.

Dadka qaadanaya abaalmarinta waxa ay codsan karaan ilaa 10% ee abaal-marinaha deeqda oo hormaris ah si loo taageero kharashyada bilowga ah ee mashruuca. Codsigu waa inuu si cad u sharaxaa baahida iyo sida loo isticmaali doono lacagaha hormariska ah. Cadeynta isticmaalka maalgelinta waa in lasoo gudbiyaa oo ay ansixisaa SPU kahor inta aanan qofka deeqda helayo loo oggolaanin inuu codsado lacag u celinta inta ka hartay abaalmarinta deeqda. SPU waxa ay ubaahan doontaa soo celinta qaar kamid ah ama dhammaan lacagaha horumariska ah haddii qofka qaadanaya abaalmarinta uusan keenin dukumiintyo taageerayo ah oo ku filan.

Ka Warbixinta

SPU waxa ay la shaqeyn doontaa qaata kaste ee abaalmarinta si ay u soo saarto qaab warbixin oo u gaar ah si loogu diiwaangeliyo waxqabadyada mashruuca, natiijooyinka, caqabadaha, guulaha, iyo casharada laga bartay. Qaatayaasha abaalmarinta waxa ay dooran karaan inay soo gudbiyaan warbixinada iyagoo daabacan ama qaab muuqaal ah ama waxa ay la kulmi karaan shaqaalaha SPU si ay warbixino afka ah ay ugu gudbiyaan.

Warbixino waa in lala soo gudbiyaa qaansheegasho kasta, warbixinta kama dambaysta ahna waa in la soo gudbiyaa kahor inta aan la qaadan deeqda ugu dambeysa. SPU waxa ay codsan kartaa inay kulan la yeelato qaata kaste ee abaalmarinta si ay dib ugu eegaan warbixintii ugu dambaysay loona waydiiyo su'aalo caddaynaya.

Dib u eegista Codsiga

Gudigga Dib U Eegista

Gudigga dib u eegista deeqda ayaa ka kooban xubnaha bulshada iyo shaqaalaha Magaalada Seattle oo ka socda qoomiyado kaladuwan iyo lehna xirfado kaladuwan. Hogaamiyaasha SPU ayaa qaadan doona tallooyinka gudigga dib u eegista marka ay samaynayaan go'aanada ugu danbeeya ee maal gelinta.

Shuruudaha Dib U Eegista

Gudigga dib u eegista deeqda ayaa muhiimada siin doona mashruucyada ayadoo lagu salaynaayo shuruudaha hoos lagu qeexay. SPU ayaa ka fiirsan doonta kaladuwanaanta goobaha, bulshooyinka saamayntu gaarayo, iyo noocyada mashruucyada. SPU ayaa la xariiri karta codsadyaasha si ay u waydiiiso su'aalo dabagal ah kahor intaan go'aanka ugu danbeeya ee maal gelinta la gaarin.

- Natiijooyinka Kahortaga Wasakhda:** Suurtagalnimada mashruuca ee ku aadan kahortaga qashinka.
 - Mashruucu wuxuu kahortagi doonaa agabka wasakhda ah ee muhiimada sare u leh SPU (mudnaanta hadda: cuntada, dharka, agabka halka mar la isticmaalo, qalabka dhismaha, iyo alaabta iyo qalabka guriga)
 - Cadadka qashinka mashruucu awoodo inuu kahortago inta lagu jiro mashruuca deeqda iyo mustaqbalka, iyo saamaynada ay ku yeelanayaan bii'ada iyo caafimaadka
 - Tirada dadka mashruucu awoodo inuu qaabab waxtar leh u gaaro
 - Mashruucu waxa uu doonayaa inuu xalliyo caqabad weyn ama inuu helo aqoon cusub oo loo isticmaali karo iyo/ama dadka kale loola wadaagi karo in lagu ballaariyo agabka ka hortagga qashinka ee Seattle
- Awooda Mashruuca:** Suurtagalnimada mashruucu guul uga gaari karo xajmiga awoodda.
 - Mashruuca ayaa leh shaqaale, iskaashato, mutadawiciin, ama ilaha dhaqaalaha oo ku filan si uu u guulaysto
 - Shaqaalaha mashruuca, iskaashato, iyo mutadawiciin ayaa haysta aqoonta, xirfada, khibrada, iyo xariirada muhiimka ah
 - Iskaashiyada ayaa marhoraba la adkeeyay, haddii loo baahdo
- Miisaaniyada Mashruuca:** Suurtagalnimada mashruucu guul ku gaari karo marka loo fiiriyo miisaaniyada la codsaday.
 - Miisaaniyadu waxay waafaqsan tahay cadadka mashruuca lasoo jeediyay
 - Qiyaasaadka miisaaniyadu waa sax
 - Qarashaadku waa kuwo ku habboon deeqda
 - Cadadka la codsaday waa mid ku habboon natiijooyinka la filaayo
- Mudnaanta:** Mashruucyadu waa inay horumariyaan mid kamid ah ama ka badan meelaha soo socda ee mudnaanta la siinayo.
 - Hal abuurka:** Adeegsiga mashruuca ee qaabab ama farsamooyin casri ah oo cusub.
 - Mashruucu waa inuu hal abuur kusoo kordhiyo aagga Seattle
 - Mashruucu waxa uu leeyahay fursad lagu ballaariyo si uu saamayn wayn ugu reebo Seattle
 - Mashruucu wuxuu la wadaagi doonaa agabka iyo kheyraadka iyo aqoonta la helay si kuwa kale looga caawiyo inay hirgeliyaan dadaalo lamid ah oo lagula tacaalayo kahortagga qashinka ee Seattle

- B) Ballaarinta Helitaanka iyo Kaqeybgalka Loo Siman Yahay:** Suurtagalnimada mashruuca si wax ku ool ah looga qeybgeliyo bulshooyinka waagi hore iyo hadaba laga reebay waxqabadyada kahortagga qashinka.
- Mashruucu wuxuu kaqeybgelin doonaa dadka asaliga ah, Afrikaan Ameerikaanka ah, soo galootiga, qaxootiyaasha, danyarta, dadka naafada ah, LGBTQIA2+, waayeelka, dadka qaangaarka ah ee da'yarta ah, dhallinta, carruurta, ganacsiyada yaryar, iyo/ama bulshooyinka kale ee laga qeybgalin
 - Mashruucu waxa uu isticmaali doonaa xeelado waxtar u noqon doona bulsho kasta oo ay hawl geliyaan
 - Mashruucu wuxuu door ka siinayaa bulshooyinka saameyntu soo gaarayo qorshaynta iyo dhaqan gelinta mashruuca
- C) Kordhinta Loo Siman Yahay ee Faa'iidooyinka Bulshada:** Suurtagalnimada mashruuca inuu kor uqaado faa'iidooyinka ka hortagga qashinka ee ay heli karaan bulshooyinka waagi hore iyo hadaba laga reebay.
- Mashruucu waxa uu faa'iido u leeyahay dadka ugu baahida badan, sida dadka ay haysato hoy la'aan ama cunto yarida
 - Faa'iidooyinka la aqoonsaday ayaa muhiim u ahaan doona bulshooyinka saameyntu ku dhacayso, sida bixinta khayraad bilaash ah ama qiimo jaban ama tababarka shaqada ee dadka danyarta ah

Hanaanka Codsiga

Jadwalka

Muddada Codsiga Ku eg Yahay	Maarso 24, 2023
Ogaysiiska Go'aanada	Bartamaha Bsha May
Heshiisyada lala saxiixdo Magaalada (mashruucyada ayaa bilaaban kara)	Luulyo 2023
Shaqada la Dhameeyay ee Qarashkeeda La codsaday	Marka la gaaro Juun 30, 2025

Tallaabooyinka Codsiga

Talaabada 1 aad: Akhri Tilmaamaha oo daawo Muuqaalka Tilmaamaha Deeqda kahor intaadan codsiga buuxin.

Talaabada 2 aad: Nalaso xariir si aad u xaqiijiso in mashruucaagu u qalmo deeqda aadna u hesho talada mashruuca: WasteFreeGrants@seattle.gov ama (206) 615-1405

Talaabada 3 aad: Buuxi Codsiga Daabacan ama Muuqaalka ah (ha samayn labadaba).

- Codsiyada Daabacan waa inaysan ka badan 10 bog.
- Codsiyada Muuqaalka ah waa inaysan ka badan 15 daqiiqo.
- Codsiyada waa inaad kusoo gudbisaa luuqada aad doonayso. SPU ayaa samaynaysa turjumaad/fasiraad.

Talaabada 4 aad: Gudbi codsigaaga deeqda iyo dukumiintiyada kaabaaya marka la gaaro 5:00 pm bisha Maarso 24, 2023. Wac (206) 615-1405 haddii aadan helin xaqiijinta iimeelka 2 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood.

Caawimaada Luuqadda

Si aad u hesho caawimaad lagu bixinaayo luuqadaha soo socda, la xariir iskaashadaheena, Environmental Coalition of South Seattle (ECOSS, Isbahaysiga Bii'da ee Koonfurta Seattle) oo aad ka helayso emak@ecoss.org ama (206) 767-0432.

SPU ayaa maal gelisa ECOSS si ay caawimaada luuqada u siiso codsadyaasha deeqda.

- Amxaari
- Cantonese
- Mandarin
- Isbaanish
- Tigrigna
- Fiitnaamiis